Härnösands kommun

# Kusoo dhawoow dugsiga hoose-dhexe



**Macluumaadka in aad dhegaysitid hadii aad ka door bidaysid?**
Halkaan waxaad ka helaysaa buugii yaraa oo cutubyo u kalaqaybsan. Ka Dhegayso qeebta rabtid.



# Dugsiga hoose-dhexe – Muxuu yahay?

Sanadka uu ilmaahagu buuxiyo lix sano wuxuu bilaabi fasalka farbarashada iyo nidamka skuulka. Fasalka farbarasha kadib wuxuu bilaabi ilmuhu fasalka 1aad. Sanadka kadib wuxuu u gudbi fasalka 2aad sidaa ayu u sii wadi ilaa fasalka 9aad.

Ilmaha aan kaligii joogi karin guriga skuulka kadib waxaa jira dugsiga madadaalada xilliga firaaqada ama fritids siday dadka badankoodu u aqaanan. Fritiska waxaa loogu talagalay ciyaalka u dhaxeeya 6 ilaa 13 sano ah oo waalidkood shaqo ama wax barasho ku maqanyihin.

Fritiska wuxuu ilmuhu aada maalintii xilliga skuula u ku jirin iyo xilliyada fasaxyada. Lama oggolo in uu Ilmahu joogo fritiska fiidkii, habeenkii iyo dhammaadka usbuuca (sabtida iyo axada). Marka laga reebo caruurta waalidkood shaqeeyaan fiidadka, habeenada iyo sabtiyadii iyo axadihii taaso ay haysan qof kale oo u ilaaliya caruurta. Caruurtaasi waxa lagu talogalay meel lagu hayo oo loo yaqaano ”nattis”. Macluumaad dheeri ah oo ku saabsan ”nattis” waxaad ka helaysa **harnosand.se/nattis.**

Dhamaan, dugsiga barbaarinta, fasalka 1aad ilaa 9aad iyo dugsiga madadaalada xilliga firaqaha waxaa loo yaqaana dugsiga hoose-dhexe.

Swiidhan skuulku waa bilaash. Laakiin hadii ilmuhu u baahdo fritids, lacag ayay degmadu kaa qaadaysa, lacagtaad bixinaysid waxay saleysantahay dhakhliga ku soo gala.

Alaabta ama qalabka skuulka ay caruurtu u baahan yihiin, sida buugaagta, iPad-yada ama kombiyuutarada kuligood waa kharash la'aan. Hase ahaate waa muhiim in caruurtu ay ilaaliyaan qalabka loo dhiibay. Haddii, tusaale ahaan, ardayga fasalka 7aad ilaa 9aad kombiyuutar uu isticmaalo ka jabo ama ka lumo, waa in u waalidkii magdhabaa.

## Adiguu muhiim ayaad tahay



Adiga waalidka ah muhiim ayaad utahay in u ilmahaagu skuulka wanaag ku dareemo. Aad ayay u rabaan skuulku in ay kula yeeshan xiriir oo kula socodsiiyan waxbarashadiisa. Taaso ad u samayn kartiin si wadajir ah si u wakhtiga ilmahu skuulka joogo sii wanaagsan ugu dhaco. Waa inaad daneeysid waxbarashada ilmahaaga oo ad ka qabyqaadatid warbixinta ka soo baxda skuulka isla markaana ad hubisid hurdo fiican in uu seexdo, qureec uu cunay iyo inuu alaabta skuulka uu u bahaanyahay qaato si ay maalintiisu ugu wacnaato.

## Waxbarasho waajib ah

Swiidhan skuulku waa waajib. Macnaheeduna waa in ay carruurta waajib ku tahay in ay skuulka aadan. Waalid ahaan mas'uul ayaad ka tahay in uu ilmahaagu aado iskuulka.

Haddii ilmuhu iskuulka iman waa in ay sabab gaar ah jirtaa tusaal ahaan ilmaha oo jiran ama fasax loo qaaday.

## Xilliyada sannad dugsiyeed

Sannad dugsiyeedku wuxuu markasta bilaabma xagaaga kadib, wuxuuna ka kooban yahay laba qaybood: Xilli dugsiyeed dayrta iyo xilli dugsiyeed guga. Xilli dugsiyeedka dayrta wuxuu bilaabma bisha 8aad wuxuuna dhammaada bisha 12aad. Xilli dugsiyeedka gugana wuxuu bilaabaa bisha 1aad wuxuuna dhammada bisha 6aad. Taariikhaha saxda ah ee sanad walba waxaad ka heli kartaa **harnosand.se** qaybta "Carruurta iyo waxbarashada" (Barn och utbildning).



## Dooro skuul

Adiga waalid ah ama mas'uul ka ah ilmahaaga waxaad codsan kartaa iskuul kasta oo dowladeed oo ad rabtid in uu ilmahaagu dhigto. Xaq ayaad u uleedahay inaad ka codsatid dhammaan iskuulada dowlada ee degmada laakin waxa dhici karta in ad boos uga weydid ilmahaaga. Si kastaba ha ahaatee, ilmahaagu had iyo jeer wuxuu xaq u leeyahay in u boos ka helo iskuulada dowlada ee degmada ee xaafada u dhow.

Haddii aad rabtid inaad codsato iskuul kale oo degmada ka baxsan oo u dhaweeyn meesha aad degan tahay, waa inaad codsigaaga si toos ah ugu gudbisaa iskuulka aad dooratay. Haduu ilmahaagu bilaabayo dugsiga farbarashada waa in aad codsiga iskuulkaad rabtid la soo gudbiyo ugu dembayn 1-da bisha labaad.

Degmada Härnösand waxaa ku yaala kow iyo toban skuul dugsi hoose-dhexe oo deygmadu leedahay, hal skull oo madax banaan iyo skuul dowladee oo loogu talagalay caruurta dhagaha la' iyo kuwa dhaawac ah xagga maqalka.

## Madalka waxbarashada schoolity

Schoolity waa madal waxbarasho oo ku saleysan webka, taas oo ay isticmaalan shaqaalaha, ardayda iyo waalidiinta si ay is kula xidhiidhaan, u arkaan joogitaanka, maqnaashaha iyo jadwalka ardayga. Madalkani waxay fududeyneysaa hawl maalmeedka ardayga iyo shaqaalaha skuulka. Waxay sidoo kale sahal kaga dhigaysaa la socodka waxbarashada ilmahaaga. Labada luqadood ee swidhish iyo ingriisi ayaa lagu qoray madalkan, adigaana dooranaya taad rabtid. Hadii aad u baahantahay caawimaad ku saabsan schoolity waxaad la xidhiidhi kartaa xarunta adeega ee degmada.

## Maqnaasho iyo bukaan

Waa inaad skuulka ogaysiisid hadii uu ilmaaagu xanuunsado oo u skuulka imaan karin. Waxaad kala socodsiin karta adigoo adeegsanaya schoolity. Maalin kasta uu ilmahaagu iskuulka imaanin waa inaad warbixinta soo gudbisaa.

Haddii ilmahaagu u baahan yahay inuu ka baxo dugsiga mar uun inta lagu jiro maalinta dugsiga, tusaale ahaan si uu u aado dhakhtarka ama dhakhtarka ilkaha, waa in aad ogeysiiso macalinka fasalka ama macalinka hagaha.

## Fasax

Waa inaad wakhti fiican kahor soo codsatiin hadii uu ilmuhu fasax u baahanyahay. Taasi na waxaad ka samayn kartiin foom ku jira harnosand. se. Ilmahu fasax ma heli karo hadii uu skuulku u arko inay fasaxaasi saamayn xun ku yeelan karo waxbarashadiisa.



Ardaygu ma heli karo fasax ka badan 10 maalmood sanad dugsiyeedkii sidaasi daraadeed waa inaa la qorsheeyo safarada dheer si ay ugu soo hagaagagaan xiliyada fasaxyada.

## Maqnaasho aan ansax ahayn

Skuulka masuuliyad ayaa saaran in uu ogaado halka dhammaan ardayda skuulka dhigta ay joogaan wakhtiga skuulka.Hadii ilmahaagu xiisad imaanin adigoo soo sheegin in uu buko ama fasax u dalbatay, waxa kuu soo dhici warbixin ku saabsan maqnaasho aan ansax ahayn. Taasina waxay micnaynaysaa in uu ilmo iskuulkii ka maqanyahay isago loo ogolaan.

Aad bay u muhiim tahay inaad si taxaddar leh u ogeysiiso hadii ilmahaagu buko ama sabab kale awgeed uga maqan yahay skuulka. Hadii aadan soo gudbin sababta uu ilmahaagu uga maqanyahay skuulka, shaqaalaha ku soo raadin ila ay kula xidhiidhaan. Marka hore talefoonka, iimaylka ama sms-ka, talaabada xigtana booqasho guri. Hadii ayna weli ilmaha helin ama ayna ogaanin sababta uu ilmuhu skuulka u imaanin waxa dhici karta in ay ugu dembayn la xidhiidhaan booliska ama xafiiska adeegga bulshada.

Hadii ilmahaaga maqnashihiisu bato, skuulkaa kuula soo xhidhiidhi wadahadal.

## Sharciga iskuulka iyo manhajka

Sharciga skuulka waxaa ku qoran xuquuqda iyo waajibaadka caruurta, ardayda iyo waalidiinta. Sharciga wuxuu kale uu sheegayaa shuruudaha la saaray mas'uulka skuulka, taaso looga jeedo maamulaha hawlaha iskuulka. Maadama ilmahaagu u dhigto iskuul degmadeed, waxa maamulaha hawlaha iskuulka ah degmada Härnösand.

Wasaarada waxbarashada waa hay'ad dowladeed oo go'aamisa waxa carruurtu ku baran doonan iskuulka iyo fasal dugsiyeedka ay ka heli doonan cilmiga. Qodobbadaas waxaay ku qoranyihiin ka loo yaqaan manhajka.

Manhajkaasi waa in ay dhammaan iskuullada iswiidhan ay raacaan. Kaaso iskuullada u ah asaaska iyo horrumarka hawshooda.

## Shahaado iyo qiimeeyn

Ardayga fasalka 1-5 waxay helaan xilliga dugsiyeedka gu'ga qiimayn ku saabsan maado kasta. Qiimayntaas waxay sheegaysa inuu ardaygu ka gudbay heerki aqoonta ee darajada fasalka.

Shahaadooyinka ugu horeeya wuxay ardayduu helaan dhamaadka xilliga dayrta ee fasalka 6. Kadibna wuxuu hela shahado cusub xilli dugsiyeed kasta ilaa la gaarayo xilli dugsiyeedka gu'ga ee fasalka 9aad oo halkaa lagu go'aaminayo shahaadada ugu dambaysa. Waana shahaadada uu ardaygu ku codsan karo dugsiga sare.

Derejeda shahaadadu waa A ilaa F, halka A ay tahay shahaadada ugu saraysa oo F na ay tilmaamayso mid aan la aqbalin.

## Caafimaadka iyo tageeraka ardayga

Waxaa jira qayb dugsiga ka tirsan oo la dhaho elevhälsa ama caafimaadka ardayga. Taaso ku lug yeelan karta dawaynta cilmi nafsi, bulsho iyo dadaal waxbarasho gaar ah. Qaybta caafimaadka ardayga waxa ka shaqeeya dhakhtarka dugsiga, kalkaalisada caafimaadka ee dugsiga, kuwa cilmi nafsiga iyo la taliyo arrimaha bulshada. Sidoo kale waxa jira shaqaale le xirfad khaas ah oo waafaqsan habka waxbaridda.

Shaqaalaha caafimaadka ardayga waa in ay gacan ka gaystaan hubinta in ardayduu fiicanyihiin oo ay caafimaad qabaan, tusaale ahaan iyagoo bixinaya wadahadallo caafimaad iyo tallalo.

Iyadoo loo marayo caafimaadka ardayga, ilmahaaga wuxuu heli karaa fursad uu ku qaato tallaallo sida ku cad barnaamijka tallaallada carruurta ee Iswiidhan. Tallaaladaasi waxay ka ilaaliyaan kow iyo toban cuduro: daacuunka, gawracatada, teeytano, xiiqdheerta, polio, infeksheno ay sababtay haemophilus nooca b, cudurka khatarta ah ee uu keeno Pneumococcus, jadeeco, rubella, iyo farayska papilloma HPV.



# Maadooyin

Dugsiga hoose-dheexe waxay ardaydu dhigtaan maadooyikan soo socda: swishish, swidhish af labaad ahaan, ingriis, xisaab, sawir, muusig, hawlgacmeedka, cilmiga barashada dhaqaalaha iyo habaynta guriga, ciyaaraha iyo caafimaadka, cilmiga bulshada, diinta, taahrikhda, juquraafi, bayoloji, fiisigiska, kimisteriga, tiknoolajiga, doorashada ardayga luuqado casriga oo ardayguu dooranayo sida sbanishka, jarmalka, ingriiska iyo barashada afka hooyo hadii loo baahnaado isla markaa.

Ardaygu ma dhigtaan maadooyinkan oo dhan hal mar mawada balse xilli dugsiyeedka iyo fasalkii walba way kala duwanyihiin.

## Swidishka luqad labaad ahaan (SVA)

Luqadda labaad ee swiidhishka waa maado gaar ah oo u dhigtamatada maadada swiidhishka. Ardayda luqadooda hooyo ahayn swiidhish waxay xaq u lahaan karaan in  loogu dhigo maadada swidhishka iyaga oo loo tix galaniyo inay tahay luqadadooda labaad oo ay ahayn tooda hooyo. Waxaa xooga lasaari ku dhawaaqa, erayaasha siday isagu xigaan iyo isbarbardhiigga luuqadaha kale ee ardayga. Skoolka ayaa goaamini haduu xaq u leeyahay inuu ardaygu dhigto swiidhishka oo luuqad labaad ah (SVA).



# Barashada luuqada hooyo iyo hagida duruusta ee luqada hooyo

Luuqada hooyo qiimo wayn ayay ku ledahay horumarka ilmaha dhanka luqada, fikirka iyo aqoonsiga iyo shaqsiyaadka qofka. Luqada hooyo oo si fiican u horumarsan waxay siinaysa fursado wanaagsan oo lagu barto swiidhishka, luqadaha kale iyo maadooyinka kale.

Ilmahaagu wuxuu heli karaa casharo ku saabsan luuqadiisa hooyo, hadii aad rabto waa inaad codsatid. Waxaadna taas kasamayn kartaa qaybta bogga internetka degmada **harnosand.se/modersmalsundervisning** (barashada luqadda hooyo).

# Ciyaaraha iyo dabaasha

Ilmahaaga caafimaadkiisa muhiim ayay u tahay inuu dhaqdhaqaaq sameeyo iyo inuu caado wanaagsan leeyahay oo wakhtigiisa firaqaada wax qiimo le sameeyo. Manhajka waxbarashada waxaa ka kooban yahay maadada isboortiga iyo caafimaadka. Tani ilmahaaga waxay siinaysa waayo-aragnimooyin wanaagsan oo ku saabsan isboortiga, dhaqdhaqaaqa iyo nolosha banaanka. Manhajkuu sidoo kale waxuu sheegaya inuu ilmahaagu barto dabaasha.

Ciyaalkoo dhan waa inay ka qayb qaatan isboortiga iyo barashada dabaasha. Waa muhiim inaad adiga waalidka ah soo xasuusisid ilmaha inuu soo qaato dharka isboortiga, kuwa dabaasha iyo tuwaal  maalmaha uu maadadadaas leeyahay. Ciyaalku waa inay dharka iska badalaan oo ay maydhaan xiisadahaas kadib.

Waa inaad macalimiinta la socodsiisid hadii ay jirto sabab uu ilmahaagu uga qayb qaadan karin isboortiga.

## Wadahadalka horumar iyo kulanada waalidka

Xilli dugsiyeed walba dugsiguu wuxuu rabaa inay kula kulmaan adiga waalid ah. Hal xilli dugsiyeedkiiba waxa jira wadahadal ku saabsan horumarka ardayga. Waxaad markaa adiga iyo ilmahaagu la kulmaysiin macalin ama la taliye oo ka wada hadlaysiin waxbarashada ilmaahaga iyo halkey wax u marayaan.

Hal mar sanad dugsiyeedkii, sida badan horraanta dayrta, waxaa jira kulanka waalidiinta. Wuxuu skuulku iskugu yeedhaa waalidiinta fasalkoo dhan si loo siiyo warbixin ku saabsan  skuulka iyo sanad dugsiyeedka soo socda.

Waa lagugu soo dhawayn skuulka Haddii ad rabti inaad soo booqatid. Laakin ka hor waa inaad u soo sheegta macalinka ilmahaaga oo ad skoolkana ogaysiisid wakhtiga imanaysid.

## Cunto

Ardaydu waxuu ka cuna qadada skuulka taas oo ah bilaash. Skuullada badankooda waxaa jira cuntooyin kala duwam oo la kala dooran karo iyo khudrado noocyo kala duwan Caruurta u baahan cunto gaar ah sababo caafimaad awgeed, tusaale ahaan xasaasiyadaha, waxay heli karaan cunto gaar ah haddii aad soo gudbiso warqad dhakhtar cadayn ah. Haddii ilmahaaga uu yahay vejeteriyaan (hilib cunin), vegaan (cunin wax kasta uu ka yimaada xayawaanka), ama uu u baahan yahay cunto gaar ah sababo diimeed awgeed, waa inaad ogeysiiso dugsiga, laakiin ma ahan inaad keento warqad cadeyn ah. **harnosand.se/specialkost**

## Baaburka skuulka geeya

Hadii uu ilmahaagu daganyahay meel ka fog skuulka ama wadada skuulka loo maro halis tahay ama ilmuhu karaankiisu dhimanyahay, wuxuu xaq u leeyahay in baabuur lagu geeyo skuuka. Taas macnaheedu waa in ilmahaaga uu si bilaash ah u helo gaadiid u dhexeeya guriga iyo dugsiga.

Gaadiidka dugsiga wuxuu noqon karaa siyaabo kala duwan. Waxaa laga yaabaa in ilmahaaga uu helo kaarka basaska oo uu raaco bas caadi ah, laakiin sidoo kale waxaa jiri kara basas khaas ah, basas yaryar, ama taksi. Waxaad warbixin dheeraad ah ka heli kartaa **harnosand.se/skolskjuts**.

Hadii uu ilmaahaga helo skool gayn ooy wax si noqdaan waxaad u qori kartaa **trafikenheten@harnosand.se**

## Telefoonada mobiilada

Ciyaalka dhigta fasalka farbarashada ilaa fasalka 6aad, mobil ma isticmaali karaan inta ay skuulka joogaan. Sidaas daraadeed waxay skoolku rabaan inuu ilmuhu mobilka guriga uga soo tago. Hadii uu ilmuhu soo qaato mobil waa inuu macalinka u dhiibo markuu skuulku bilowdo waxaana loo celin markuu dhamaado.

Ardayda fasalka 7-9 dhigta looma ogola inay mobikal haystaan wakhtiga xiisadaha.

## Wergelinta waajibka ah

Hadii uu qof ka shakiyo in ilmuhu ku jiro xaalad xun, waxay u gudbin karaan degmada. Waxaa lo yaqaan warbixin arrin welwel, tusaale ahaan waxay ahaan kartaa walaac ku saabsan ilamaha loo gacan qaado ama helin xanaanada u ubahaanyahay.

Dhammaan dadka shaqadooda ku lug leh carruurta iyo dhallinyarada waxay ku waajib tahay inay wergelin arrin welwel gudbiyaan hadii u ay shaqadooda ku arkaan xaalad muujinaysa in ilmuhu uu ku jiro xaalad xun.

## Dugsiga madadaalada xilliga firaaqaha (Fritids)

Fritisku wuxuu furanyahay maalmaha shaqada laga bilaabo 06.30 subaxnimo ilaa18:30 galabnimo.

Fasaxa wuxuu furan yahay maalmaha shaqada laga bilaabo 06:30 subaxnimo ilaa 18:30 galabnimo. Caruurta waxay xaq u leeyihiin inay ku jiraan fasaxa inta labada waalid ay shaqeynayaan. Waa inaad horey u ogeysiisaa waqtiyada uu ilmahaagu ku jiri doono fasaxa.

Afarta jeer ee sanadka waxaa jira maalmo qorshayn ah oo fasaxa. Maalintan, shaqaalaha waxaa beddelaya shaqaale ku meel gaadh ah, waxaana dugsiyada badankoodu kaaga baahan yihiin inaad waalid ahaan sameyso is-diiwaangelin dheeri ah haddii ilmahaaga u baahan yahay inuu joogo fasaxa maalmahaas.

Haddii ilmahaaga uusan u baahneyn meel uu ku joogo fasaxa, waa inaad ka joojisaa goobta ugu yaraan 14 maalmood ka hor.

# Sawir qaadista iyo filim duubinta skuulka dhexdiisa

Shaqaalaha skoolka ka shaqeeya wax way sawiri iyo duubi karaan. Taas waxay usameeyaan si ay u hormariyaan una fududeeyaan waxbarashada. Lama ogola inay waalidku sawir qaadan ama wax duubaan skuulka dhexdiisa.

Foom baa lagu siina oo ku qoraysid hadii aad ogoshahay inu ilmahaaga ka muuqdo sawirada qaybta degmada iyo barada bulshada. Foomka waxaa loo yaqaan Oggolaanshaha daabacaadda xogta shakhsiyeed, sawirrda iyo filimada. Dugsiga barbaarinta - fasalka 9.

# Foomamka iyo adeegyada elektaroonigga ah

| | | |
|---|---|---|
| Cunto Gaar ah | Barashada Luqadda Hooyo | Ogolaanshaha Daabacaadda/GDPR |

# Macluumaadka la xidhiidhka skoolka

Härnösands
kommun